

Degmooyin badan ayay dawladdu ku soo rogaysaa tillaabooyin gobol oo looga hortegayo is-qaadsiinta cudurka

Oslo iyo degmooyin badan oo Viken iyo Innlandet ku yaalla ayay dawladdu ku soo rogaysaa tillaabooyin gobol si loo hakiyo oo loo xaddido faafidda nooca fayraska cusub ee omikoroon.

– Hadafku waa in la xakameeyo cudurka safmarka ah. Waa in aan ilaalinnaa awoodda adeegyada caafimaadka ee degmooyinka hadda laga yaabo in uu noocan omikoroonku ka dillaacay. Waxaa muhiim ah in aan degdeg u xaddidno xiriirka iyo dhaqdhaqaaqa dadka ee aagaggaan. Dooni meyno in aan nolosha dadka sabab-la'aan u xaddidno, laakiin tillaabooyin kuwaan ka xooggan ayay dawladdu soo rogi doontaa haddii ay taasi lagama maarmaan noqoto, ayuu yiri raysul wasaare Jonas Gahr Støre.

Waxaa la xaqiijiyay in uu nooca omikoroon si weyn uga dillaacay Oslo, kaas oo ka billowday xaflad kirismas. Waxaa xafladda joogay dad ka kala yimid Oslo iyo degmooyinka caasimadda agagaarkeeda ah. Waxaa kale oo iyagana la xaqiijiyay in nooca omikoroonka laga helay Øygarden iyo dad Norway yimid oo ka soo safray Afrikada koonfureed.

Degdeg ayuu u faafaya

Machadka Caafimaadka Dadweynahu wuxuu qabaa in cudurka sida weyn uga dillaacay xafladda in uu muujinayo in omikoroon aad u faafi og yahay, iyo in laga yaabo in aan tallaalku waxtar badan lahayn marka la eego faafidda is-qaadsiinta cudurka. Ilaa iyo hadda lama caddayn in uu noocan omikoroonku keenayo in aad loogu xanuunsado. Waxay u badan tahay in tallaalku difaacayo in cudurka aad loogu xanuunsado, laakiin lama hubo ilaa inta difaacaasu gaarsiisan yahay.

– Wuxaan u baahannahay aqoon intaan ka badan. Tillaabooyinka heer gobol ee aan soo rognay ayaan ku hakinaynaa in nooca omikoroonku Norway ku faafo ilaa

iyu inta laga tallaalayo waayeel intan ka badan annaguna aan ka helayno aqoon intan hadda ka badan. Waxaa kale oo jira in cudurku ku faafayo guud ahaan waddanka, gaar ahaanna Oslo iyo Viken. Is-qaadsiinta cudurka ee guud ayayna tillaaboooyinku xaddidi doonaan, ayay tiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka Ingvild Kjerkol.

Tillaabooyinka heerka gobol waxaa lagu soo rogayaa degmooyinka uu nooca omikoroonku ka dillaacay iyo kuwa uu culayska weyn saaran yahay adeegyada caafimaadka khaaska ah. Degmooyinka tillaaboooyinka lagu soo rogay waxaa ka mid ah kuwa hoos yimaada isbitaalka jaamacadda ee Akershus. Qaar badan oo degmooyinkaan ka mid ah ayaa ah isku aag degaan- iyo mid shaqo, aad bay dadku dheddooda ugu kala socdaan.

Degmooyin gaar ah ayaa lagu soo rogayaa tillaaboooyin heer gobol ah ayada oo loo cuskanyo xeer-hoosaad:

- Af-daboolku waa waajib mararka aan hal mitir la kala fogaan karin lana joogo dukaammada, suuqyada waaweyn, goobaha cuntada iyo cabbitaanka, gaadiidka dadweynaha, gudaha boosteejooyinka iyo taksi. Waajibka xirashada af-daboolka ma khuseeyo carruurta ka yar 12 sano, ama dadka aan af-dabool xiran karin arrimmo caafimaad ama sababo kale awgood. Waxaa sidoo kale lagu talinaya in af-dabool la xирто marka la joogo meel dadku ku badan yahay islamarkaana ay adag tahay in la kala foggado, sida marka qabanqaabo laga baxayo oo ay dad badan mar jaakadaha soo wada qabsanayaan oo kale – ama marka laga baxayo garoon kubbad cag oo kale. In af-dabool la xирто waajib ma aha marka la fadhiyo goob joogto oo qofka loo tilmaamay ama la joogo goob cunto iyo cabbitaan oo miis la haysto.
- Goobaha shaqada ee ay suuragalka tahay in guriga lagu shaqeeyo ayada oo aan taasi wax u dhimayn adeegyada muhiimka ah ee lagama maarmaanka ah, waxaa waajib ku ah in ay shaqaalaha u suurageliyaan in ay guriga ku shaqeeyaan toddobaadka oo dhan ama qaybo ka mid ah. Waxaa tusaale ahaan la samayn karaa in ay shaqaaluhu wakhtiga barkiis guriga ku shaqeeyaan.

- Tirada dadka qabanqaabooyinka gaarka ah ee gudaha ka dhaca waxaa lagu xaddidayaa ilaa iyo 100 qof marka la joogo goob dadweyne ama goob la kireystay ama la amaahday.
- Goobaha cuntada iyo cabbitaanka iyo kuwa wax qabanqaabiya waxaa waajib ku ah in ay diiwaangeliyaan dadka u imaanaya si ay ugu digaan haddii dad cudurka laga helo.
- Goobaha cuntada iyo cabbitaanka iyo qabanqaabooyinka loo oggol yahay in ay khamri bixiyaan, waa in ay khamriga miis ku bixiyaan
- Goobaha cunatada iyo cabbitaanka ee loo oggol yahay in ay khamri bixiyaan, waa in dadku haystaan meel ay fadhiistaan
- Tirada dadka qabanqaabooyinka gudaha ka dhaca ee aan dadku haysan goobo joogto ah ee loo tilmaamay waxaa lagu xaddidayaa ilaa iyo 600 qof (oo u qaybsan kooxo tiiba 200 tahay).

Degmooyinka soo socda ayaa lagu soo rogay xeer-hoosaadka tillaaboooyinka heer gobol:

- Oslo
- Asker
- Bærum
- Grue
- Kongsvinger
- Nord-Odal
- Sør-Odal
- Eidskog
- Hurdal
- Nannestad
- Ullensaker

- Gjerdrum
- Nes
- Lørenskog
- Lillestrøm
- Rælingen
- Aurskog-Høland
- Enebakk
- Nordre Follo
- Ås
- Nesodden
- Frogn

Tillaabooyinka heer gobol waxay dhaqangelayaan laga billaabo saqda dhexe jimcada 3-da diseembar. Tillaabooyinku waxay markan hore soconayaan 14 maalin.